



## Qiimeynta Dugsiga Barbaarinta Carruurta ee Oregon

Waxaan rajayneynaa in aanu ardaydaaga barbaarinta carruurta “kindergartener” dhiganaya ku soo dhawayno maalintii u horreysay ee dugsiga taasi oo loogu talagalay ardayda barbaarinta carruurta “kindergarten” ku jirta, Ogoosto 30, 2018-ka. Marka la joogo Oregon, dhammaan ardayda soo socota ee barbaarinta carruurta “kindergartener” ku jirta waxay ka qayb qaataan Qiimeynta Kindergarten ee Oregon (OKA) taasi oo dhacda toddobaadyada ugu horeeya ee dugsiga. Qiimeyntan waxaa lagu ururiyaa macluumaad ku saabsan wax akhriska/qorista hore ee ilmahaaga, xisaabta hore iyo xirfadaha dhanka bulshada. Macluumaadkani wuxuu bixiyaa sharaxaad gaaban oo muhiim ah oo ku saabsan sida ay carruurta Oregon wax u wadaan marka ay yimaadaan dugsiga. Xogtan la'aanteed, hadda ma jирто hab kale oo lagu ururiyo sharaxaad gaaban oo gobolka oo dhan oo ah waxbarashada hore.

### Halkan waxaa ku qoran su'aalaha inta badan la isweydiyo oo ku saabsan OKA

#### Arday ma ku guuldareysan karaa OKA?

MAYA! Qiimeynta Kindergarten ma aha imtixaan lagu gudbayo ama lagu guuldareysanayo; waa waxyaalo lagu ogaanayo sida Oregon wax u wado gobol ahaan marka ay noqoto taageerada carruurta iyo qoysaska ka hor inta aanay dugsiga gelin. Qiimeyntani waxay sidoo kale macallinka ilmahaaga siisaa tilmaanta iyo fahamka baahiyaha waxbarasho ee ilmahaaga iyo qorshaha sida ugu wanaagsan ee loo dabooli karo baahiyahaasi.

#### Muddo intee le'eg ayuu OKA qaataa?

Waxay carruurta intooda badan ku qaadataa 15-20 daqiqo si ay u dhammeystiraan qaybta Wax akhriska/qorista Hore iyo Xisaabta Hore ee OKA. Ka dib marka ay toddobaadyo dhowr joogaan dugsiga, macallimiintu waxay la socon doonaan isla markaana qori doonaan xirfadaha bulsheed ee ardayda. Tani waa Sida loola macaamilo qaybta Waxbarashada ee OKA.

#### Miyuu ilmahaygu dooran karaa in aanu ka qayb qaadan imtixaanka?

Waaliidiintu waa in ay la hadlaan macallinka ama maamulaha dugsiga haddii ay u baahan yihiin in laga dhaafsi ilmhooda sababo diimeed ama naafanimo oo jirta.

### Hawlaho iyo Ciyaaraha lagu Dhiirigelinayo Guusha Dugsiga

#### Sidee ayaan caawimaad uga geysan karaa u diyaarinta ilmahayga ee dugsiga barbaarinta carruurta “kindergarten”?

Ka waalid ahaan, waxaad tahay qofka u horreysa ee ilmahaaga – iyo ka ugu muhiimsan – macallin. Waxaad bilaabi kartaa in aad ka dhaadhiciso jacaylka waxbarashadu leedahay iyo dhisidda xirfadaha hore adiga oo adeegsanaya hawlo iyo ciyaaro madadaalada leh. Halkan waxaa ku qoran tusoolaayinka qaarkood:

- **Wax u akhri oo la hadal ilmahaaga.** Wax isla akhriska iyo hadalka wadajirka ahi wuxuu dhisaa ereyada. Maktabadaadu dadweynuhu waxay bixisaa buugaag iyo waqtio sheeko. Kala hadal ilmahaaga waxyaabo ku saabsan bilaabida dugsiga barbaarinta carruurta “kindergarten” iyo la kulanka saaxiibo cusub. Weydii haddii uu ilmahaagu qabo su'aalo ku saabsan dugsiga idinka oo wadajirana la qaybsada macallinka.
- **Ku dhaqma jadwalka dugsiga oo joogto ka hor inta aanu dugsigu bilaabmin.** Waxyaabaha sida sida joogtada loo qabtaa waxay yareeyaa diiqada ku imaanaysa carruurta iyo waaliidiinta, waxayna sidoo kale ka taageertaa imaanshaha wanaagsan ee dugsiga. Imaanshaha wanaagsan ee dugsiga barbaarinta carruurta “kindergarten” wuxuu horseedaa guusha dugsiga! Ku dhaqan wakhtiga hurdada oo hore iyo wakhtiga toosida iyo is maca salaamayn kalsooni leh. Si aad uga caawiso waxyaabaha sida joogtada loo qabto, idinka oo wadajira sameeya liiska hubinta ee subaxa oo leh sawirrada hawl kasta.
- **Xisaabta u isticmaal hawl maalmeedka iyo waxyaabaha sida sida joogtada loo qabto.** Ka caawinta in la kala sooco isla markaana la isbarbardhigo sharabaadyada la dhaqayo, tirinta ulaha karootada ‘carrot sticks’ wakhtiga cuntada fudud la cunayo, iyo magacaabista muuqaalada shay’adu leeyihii ee yaala qolku waa siyaabo dhowr ah oo fudud oo lagu barto fikradaha xisaabta.

### Tusaalooyinka iyo meelaha laga sii gelayo ilaha dheeraadka ah waxaa laga helayaa hoosta.

- **Website-ka Dugsiyada Dadweynaha Portland ee Waxbartaha Hore:** [www.pps.net/Domain/183](http://www.pps.net/Domain/183)  
[https://oregnearlylearning.com/early-learning-kindergarten-guidelines](https://oregonearlylearning.com/early-learning-kindergarten-guidelines)
- **Multnomah County Library:** <https://multcolib.org/every-child>
- **Colorin Colorado:** <http://www.colorincolorado.org/guide/tips-parents-kindergartners>